



City of Seattle

Seattle Human Resources (Shaqaalaha Dadweynaha Seattle)

Kimberly Loving, Agaasime ku xigeenka

Diwaangelinta Furan
Waxay dhamaanaysaa 5:00 pm
markay taariikhdu ahayd
Oktoober 22

Sebtembar 27, 2021

Ujeedo: Samee Isbedelada Gunnooyinkaaga 2022 maalinta Jimce, Oktoobar 22

Shaqaalaha Magaalada Qaaliga ahow:

Sannadkan, ilaalinta caafimaadka, fayoobaanta iyo adkeysiga ayaa muhiim u ah sidii hore. Magaaladu waxay siisaa shaqaalaha iyo qoysaska inay kala doortaan faa'iidooyin kala duwan oo taageera caafimaadka iyo ladnaanta maaliyadeed. Diiwaangelinta Furan waa wakhti lagu qiimeeyo baahiyahaaga 2022 oo isbeddel lagu sameeyo xulashada dheefahaaga. Diiwaangelinta Furan waxay bilaabmaysaa 8:00 am Jimcaha, Oktoobar 1 waxayna dhammaanaysa 5:00 pm Jimcaha, Oktoobar 22, 2021.

Wax ficiil ah lagaama doonaayo si aad usii wado gunnooyinka xilligaan ee 2022 ilaa inaad doonayso maahee inaad iska qorto ama mar kale iska diiwaan geliso Koontooyinka Qarashka Isbadbadala (FSA). **Lacagaha mushaarka ee loo jarto caafimaadka ayaan la kordhin doonin sanadka 2022.**

Xulashooyinka Adeeggaaga Shaqsiga ah ee Shaqaalaha (ESS):

- ☐ **Iska diiwaangeli/dib isaga diiwaangeli FSA.** Si aad ugu qoondeyso lacagta canshuurta kahor 2022 Daryeelka Caafimaadka ama Daryeelka Ku-tiirsanaanta (Xannaano-maalmeedka) FSA, waa **inaad dib isu diiwaangelisaa** inta lagu jiro Diiwaangelinta Furan adigoo adeegsanaya ESS. Xulashadaada FSA ee hadda haraageeda looma wareejinaayo sanadka soo socda. Si aad u hesho macluumaad ku saabsan qorshaha, ka eeg <http://bit.ly/mostFSA>.
- ☐ **Badal Gunnooyinkaaga.** Samey qorshaha faa'idooyinka kala duwan, ama ku dar ama ka reeb ku tiirsanaayaashaada.
- ☐ **Cusbooneysii faa'idooyinkaaga.** ESS ka eeg ka-faa'iideystayaasha caymiska Nolosha iyo AD&D.

Eeg bogga xiga wixii ku saabsan isbeddelka qorshaha iyo tilmaamaha diiwaangelinta 2022. Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku aadan *Open Enrollment Highlights (Warbixinta Diiwaangelinta Furan)* ka fiiri <http://bit.ly/benhome1>.

Ogaysiiska Xiliga kama danbaysta ah: Si aad u dejiso FSA ad u samayso isbeddelada dheefaha 2022, waa inaad sidaas samaysaamarkay saacadu tahay **5:00 pm maalinta Jimcaha, Oktoober 22** iyadoo la isticmaalayo qaybta Adeega Qofka Iskii u Isticmaalo.

Diiwaangeli xulashooyinkaaga gunnada 2022: daabac ama qaad sawir ka mid ah **“Doorashooyinka Diiwaangelinta Furan oo Kooban”** ee Qaybta Shaqaalaha ee Qofka iskiis u isticmaalo oo barbardhigo bayaanka gunnooyinka 2022 ee aad heli doonto Janaayo. Wixii su'aalo ah, fadlan la xariir wakiilka waaxdaada gunnooyinka (<http://bit.ly/benhome1>).

Seattle Human Resources (Shaqaalaha Dadweynaha Seattle)

Seattle Municipal Tower, 700 5th Avenue Suite 5500, PO Box 34028, Seattle, WA 98124-4028
(206) 684-7999 • TTY: 7-1-1 Fakis: (206) 684-4157 • Websaydhka shaqaaleesiinta: www.seattle.gov/jobs
Shaqo bixiyaha fursada shaqo oo siman. Guryaha dadka curyaamiinta ah waxaa lagu bixiyaa codsi.

Si daacad ah,



Renee Freiboth

Maareeyaha Faa'idooyinka

Isbeddellada Qorshaha ee Dhammaan Shaqaalaha* Waxuu wax ku ool noqonayaa Janaayo 1, 2022

Akoonada Kharashka Dabacsan

FSA da Caafimaadka	Kordhinta wax-ka-beddelka \$550 illaa mid aan xad lahayn laga bilaabo 2021 illaa 2022 inta ay jirto haraaga ugu yar oo dhan \$120 sannadka 2022
Xannaano Maalmeedka FSA	Yareynta doorashada sanadlaha ah ugu badnaan \$10,500 ilaa \$5,000 qoyskiiba (xadka IRS)
	Kordhinta wax-ka-beddelka \$0 illaa mid aan xad lahayn laga bilaabo 2021 illaa 2022 inta ay jirto haraaga ugu yar oo dhan \$120 sannadka 2022

Isbeddellada Qorshaha Shaqaalaha intooda badan* Waxuu wax ku ool noqonayaa Janaayo 1, 2022

Ka hortaga Aetna iyo Qorshayaasha Dhaqanka

Adeegyada Dumarka	Ballaarinta caymiska laga bilaabo Tier 2 illaa Tier 3, oo ay ku jiraan Teknooloojiyada Taranka Sare
	Kordhinta xadka gunnooyinka nolosha laga bilaabo \$10,000 ilaa \$20,000
	Ku darista bacriminta oo ah adeeg lagu daawaynayo dumarka aan lahayn lamaane lab ah
	Ku darista baaritaanka hidde-sidaha ee uurjiifka dadka qaba cillad hidde-siddaha ee la yaqaano oo qoyska dhexdiisa ah oo la dhaxli karo

Kaiser Standard Qorshaha Waxa Laga jari karo

Daaweynta Goobta Durista	Ka-dhaafitaanka saamiga kharashka ee maamulka daaweynta durista ee shabakadda ee goob guri
Adeegyada Dumarka	Ballaarinta caymiska Bacriminta iyo Kordhinta ugxanta oo kaliya si loogu daro Teknooloojiyada Taranka ee Sare
	Kordhinta xadka gunnooyinka nolosha laga bilaabo \$10,000 ilaa \$20,000

	Ku darista bacriminta oo ah adeeg lagu daawaynayo dumarka aan lahayn lamaane lab ah Ku darista baaritaanka hidde-sidaha ee uurjiifka dadka qaba cillad hidde-siddaha ee la yaqaano oo qoyska dhexdiisa ah oo la dhaxli karo
--	---

* Ka eeg *Open Enrollment Highlights (Warbixinta Diiwaangelinta Furan)* ka fiiri <http://bit.ly/benhome1> si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.

Iska diiwaangeli Onleenka

Fadlan ha sugin illaa maalinta ugu dambeysa si aad u sameysid isbadelada onleenkaaga.

Adoo adeegsanaaya kmbuyuutarka guriga ama Magaalada	ess.seattle.gov	Dooro "Login to ESS" (Gel barta ESS)	Kadib markaad gashid, dooro qaybta "Open Enrollment" (Diiwangelinta Furan) ee ka hooseyso qaybta <i>Benefits</i> (Gunnooyinka)
--	-----------------	--------------------------------------	--